




Mir yar: Sheekadii Wangari Mathay




 Soomaali 

|| 3

 Anwar Mohamed Dirie

 Maya Marshak

 Nicola Rijdsdijk




Global Storybooks


globalstorybooks.net


Mir yar: Sheekadii Wangari

Mathay

 Nicola Rijdsdijk

 Maya Marshak

 Anwar Mohamed Dirie



This work is licensed under a Creative Commons

[Attribution 4.0 International License.](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0)

<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0>





Tuulo ku taal dhinaca hooseyo
buurta Kenya ee Bariga Afrika,
gabar yar ayaa hooyadeed kala
shaqeyn jirtay beeraha. Magaceedu
waxa uu ahaa Wangari.

Wangari bannaanka ayaa u
jeclaan jirtay. Baangad ayay ku
qodqodday carrada beerta
qoyskooda. Waxayna dhulka
qandacsan ku aaday miro aad u
yaryar.






Watigay ugu jeclayd maalinta waxa uu ahaa marka ay cadceeddu dhacdo. Marka ay mugdi saaid u noqoto aragtida dhirta, Wangari waxay ogaataa in ay tahay xilligii ay guriga aadi lahayd. Waxayna qaadaa waddoyin dhuudhuuban oo dhex maro beeraha, ayadoo gudbeyso webi yaal markay baxdo.




Wangari waxa ay dhimatay 2011, laakiin waa aannu xusuusannaa mar walba oo aan aragno geed qurux badan.

Wangari waxa ay ahayd ilma fariid ah wayna sugi la eyd in ay iskuul aado. Laakiin hooyadeed iyo aabbaheed waxa ay doonayeen in ay jooqto oo ay guriga ka caawiso. Markii ay toddoba jirsatay, walaalkeed ka weyn ayaa ku qalqaaliyey walaalkeed in ay u oggolaadaan in ay iskuul aaddo.



Wangari si adag ayay u shaqaysay. Dadka dunida oo dhan ayaa ogaaday, waxaa na la siiyey abaalmarin caan ah. Waxa la yiraahdaa Abaalmarinta Nabada ee Nobel, waxa ayna noqotay ee haweeneyda ugu horeysay ee kaliigeed Afrika laga siiyey abid.







Way jeclayd in ay wax barato!
Wangari waxay wax ka baratay in badan oo badan buug walbey aqrisay. Iskuulka oo ay aad ugu wanaagsanaatey darteed waxaa lagu casuumay in ay wax ku barato dalka Maraykanka. Wangari waa ay faraxday! Waxa ay doonaysay in ay wax badan ka ogaato dunida.



Waxuu waqti gudbo ba, dhirtii cusbeyd waxa ay noqotay kayn, webiyadiina mar kale ayay biyo keeneen. Farriintii Wangari, Afrika ayay ku faaftay. Maanta, malaayiin geedo ah ayaa ka soo baxay mirihii Wangari.




Wangari wax badan oo cusub ayay ku baratay jaamacada maraykanka. Waxa ay baratay dhirta iyo sida ay u baxaan. Waxa ayna xusuusatay sidii ay usoo kortay: la ciyaarki walaaladeed hooska geedaha. kaymihii qurxoonaa ee Kenya.



Wangari way garanyay waxa ay tahay in la sameeyo. Waxa ay bartay haweenkii sida dhirta miro looga abuurto. Haweenku dhirta ayay sii iibin jireen lacagta ka soo baxdana waxay u isticmaali jireen in ay qoyasaskooda ku daryeelaan. Haweenkii waxa ay noqdeen kuwo faraxsan. Wangari ayaa ka caawisay in ay dareemaan awooddooda iyo xoog.



Markii ay wax sii baratuba, waxa ay sii ogaanaysay in ay dadka Kenya aad u jeceshahay. Waxa ay doonaysay in ay noqdaan kuwo faraxsan oo xor ah. Markii ay wax sii baratuba, waxa ay soo xusuusan jirtay gurigeedii Afrika.



Markii ay wax barashadeedii dhammeysatay, waxa ay ku noqotay Kenya. Laakiin wadankeedii waa is beddelay. Beero baaxad leh ayaa is daba jiidnaa dalki. Haweenku ma heysan xaabo ay wax ku karsadaan. Dadku fakhri ayay ahaayeen, carruurtuna waa ay gaajeysnaayeen.